**LES TROYENS À CARTHAGE**

Dhacdooyinka 1 iyo 2 (*La prise de Troie*), Kadib sanado badan oo dagaal socday, magaallada Troy waxaa ugu danbayn burburiyay Ciidanka Giriiga.

**Dhacdada 3. Madaxtooyada Dido oo ku taalla Carthage.** Koox faneed badan ayaa salaan u saaray Boqorad Dido. Markii ninkeedii koowaad, Boqor Sychaeus ee Tyre, la toogtay, Dido ayaa dadkeeda u rartay Waqooyiga Afrika, markaas oo ay intaas kadib ka dhisteen magaallada barwaaqo sooranka ah ee quruxda badan ee Carthage. Dadka ayaa ku dhaartay inay Dido ka difaacaan boqorka dariska la ahaa, Larbas, kaasoo dalbaday inay guursato haddana ku hanjabaaya inuu qabsan doono dhulkooda.

Walaasha Dido oo la yiraahdo Anna ayaa aaminsan in Dido u baahan tahay nin ay jaceyl la wadaagto nolosheeda markale. Laakiin Dido, oo aad u xasuusata ninkeedii Sychaeus ee la dilay, ayaa dareemaysa murug waxayna doonaysaa inaysan nin kale guursan.

Markab shisheeye, oo daadku soo dawaafay, ayaa magangalyo u soo doontay dekadda. Jabaqda kaardinta Trojan ayaa la maqlay; Ascagne, oo ah wiilka Aeneas, ayaa u hadlay qaxootiyaasha, kuwaasoo kasoo cararay burburka magaaladooda, Troy. Dido ayaa soo dhawaysay. Waqtigaas Narbal ayaa bilaabay inuu walaac dareemo: Ciidanka Iarbas' ayaa ku soo dhawaaday dhulkooda una hanjabaaya Carthage. Isla markiiba Aeneas ayaa kasoo dhex booday shacabka Trojans kuna yaboohay inuu ka hortagaayo cadawga Dido. Si farxad leh ayay u aqbashay caawimaadiisa, waxayna ciidankeedii u kaxaysatay si ay u difaacdo Carthage.

**Dhacdada 4. Ugaarsiga Boqortooyada iyo Dufaanta.** Kayn ku taala banaanka Carthage, duufaan ayaa soo gashay. Ayagoo kasoo laabtay ugaarsiga, Dido Aeneas ayaa galay god ayadoo wiriqda roobku dhacayso. Gugaca roobka ayaa kiciyay dareenkooda, waxayna sameeyeen galmo muujinaysa jaceylkooda, ayadoo marqaatigoodu ahaa bii'ada dabiiciga ah.

**JOOJIN**

**Beeraha Dido ee ku yaala badda.** Narbal ayaa si qarsoodi ah ugu sheegay Anna inuu ka cabsanaayo in Dido, oo uu mashquuliyay Aeneas, ay dayacday danaha dowladda. Anna ayaa u sheegtay in Dido ay jeceshahay Aeneas. Anna ayaa rajaynaysa in jacelka, oo ah kan ugu awood badan ilaahyada, uu Dido siin doono awood ay ku helayso iskaashiga cusub ee ay la sameeysay Aeneas.

Lopas, oo ah gabyaada madaxtooyada, ayaa ku heesay amaanka Ceres. Dido ayaa ka codsatay Aeneas inuu sii wado sheekada nasiibka Troy. Maxaa ku dhacay Andromache? Aeneas ayaa sharxay in dhammaadkii ay islaantii uu ka dhintay Hector ay guursatay inuu qabsaday oo ahaa Pyrrhus. Ascagne ayaa si aamusan u siibay faraantiga guurka Dido (ee guurkeedii koowaad). Dhanka Anna, wiilka ayaa u eg Cupid—oo ah xasuusta awooda aan la dafiri karin ee jaceylka.

Dido iyo Aeneas, oo keligood jooga beerta, ayaa ku heesay heesta labaaleeyda "Nuit d'ivresse et d'extase infinie." Laakiin inkasta oo ay isjecel yihiin, ilaaa Mecury ayaa xasuusiyay Aeneas higsigiisa ah inuu ka baxo Carthage uuna helo boqortooyo awood badan: "Italie!"

**Dhacdada 5. Dekadda xili habayn ah.** Maraakiibta Trojan ayaa baalaha loo dhigay. Panthée iyo hogaamiyaasha Trojan ayaa diyaarinaaya safarka marakaiibta; daqiiqad kasta oo la sugo waxay kordhinaysaa carada ilaahyada.

Aeneas, oo u kala qaybsamay jaceylkiisa Dido iyo masuuliyada ilaahiis u dirsaday si uu u badbaadsho dadkiisa uuna u aasaaso boqortooyada Roma, ayaa ku heesaya aria “Inutiles regrets.” Reer aakharaadka Troy ayaa ku amraaya inuu raaco higsigiisa. Maskaxdiisa waxay go'aan ku gaartay, wuxuu ku maray Trojan-yada inay fuulaan doomahooda. Dido, oo qalbi jab ku jirta, ayaa ka baryaysan Aeneas inuu la joogo ayada. Laakiin markii dhawaaqa dhaqaaqa Trojan la yeeriyay, Aeneas ayaa fuulay markabkiisii.

**Qasriga Dido.** Dido ayaa iskudayday inay Anna ku cadaadiso inay dekadda tagto oo joojiso safarka. Anna ayaa sheegtay in Aeneas uu jecel yahay Dido, inkasta oo waajibaadkiisu ku qasbayaan inuu iskaga tago. Dido ayaa sheegtay in jaceylku uu ku qasbaayo ayada inay diido amarka jaceylka naftirkiisa. Markii maraakiibtii u baxeen bad weynta, Dido ayaa caro la dhawaaqday, ayadoo ku amartay ciidamada Carthage inay cayrsadaan oo burburiyaan ciidanka Trojan ee khaa'imiinta ah. Hal wax ayaa u haray ayada: inay u dhisto tuur xun ilaahyada aakhrida, ayna dusha tuurka ku gubto wax kasta oo uu mar uun lahaa Aeneas. Maadaama ay keli noqotay, Dido ayaa qorsheysay geerideedii. Ayada oo ku heestay “Adieu, fière cité,” waxay macsalaamaysay Carthage, magaallo ka dhalatay higsigeedii iyo shaqadeedii, magaallo sii jiri doonta ayadoo noqonaysa taariikhda awoodeedii iyo ruuxiyadeedii.

**Xayndaab saaran xeebta.** Tuurka tacsida ayay dul istaageen wadaadada diinta Pluto. Anna iyo Narbal ayaa habaaray Trojan-yada. Dido ayaa ku dul tiiraanyootay tuurka, waxay qaadatay seefta Aeneas, waxay waxyi ku aragtay in maalin uun dadkeedu dhali doonaan dagaal yahan, Hannibal, kaasoo dadka Carthage uga aari doona Rome. Waxay seefta iska gelisay naaska. Laakiin riyo, ayay Dido ku aragtay Rome oo guulaysatay. Way dhimatay ayadoo ay dadka Carthage habaarayaan Trojan-yada. Laakiin Ciidanka Trojan ayaa is diidayay, riyada Rome Waaraysa ayaana kasoo baxday gadaasha tuurka Dido.